Mediemyndigheten

SI TOOS AH ONLINE

# Garaadka macmalka ah – AI

**AI AI wuxuu u taagan yahay garaadka macmalka ah (Artificiell Intelligens), wuxuuna ku saabsan yahay in qalab farsamo loo isticmaalo si loogu ekaysiiyo garaadka bini-aadamka – oo ah awoodda maskaxdu u leedahay inay macluumaadka qaabisho, kaydiso, falanqeyso, isla markaana isticmaasho. Teknoolajiyaddu waxay horumaraysay muddo tobannaan sano ah, balse sannadihii ugu dambeeyey waxay gaadhay guul ballaaran oo dadweyne ah, taas oo ay sabab u yihiin adeegyo awood leh oo leh adeegsiyo maalinle ah. Horumarkaas waxaa horseeday talaalo- ka wanaagsan kuwii hore, qiimaha qalabka wax farsameeya oo raqiisay, iyo helitaanka xog aad u ballaaran. Horumarka waxaa dardargeliyey talaabo-talaabada (algoritmer) ka sii wanaagsanaanaysa, awood xisaabeed raqiiska ah iyo helitaanka xog aad u badan.**

## Garaadka macmalka ah (AI) iyo barashada mishiinka

AI waa erey-bixin taariikh ahaan ka koobnaan jirtay farsamooyin iyo habab badan oo kala duwan, laakiin AI-da aynu maanta arkayno waxay ku dhisan tahay farsamo loogu yeero barashada mashiinka. Barashada mishiinka waxay macnaheedu tahay in kumbuyuutarrada loo oggolaado inay iskood wax uga bartaan waayo-aragnimadii hore, ka dibna ay aqoontaas u adeegsadaan xaalado cusub.Marka laga hadlayo barashada mashiinka, waxaa la dhisaa suuragalnimada ayadoo la adeegsanayo xog tusaale ah. Tani waxay sahlaysaa in xogtaas hore loo isticmaalay si loo qiyaaso qiyamka mustaqbalka ee aan weli la aqoon. Haddii tusaalooyinka loo adeegsaday ay si dhab ah u matalaan xaqiiqda iyo dhibaatada la rabo in la xalliyo, markaas qiyaasaha mashiinku sameeyo waxay noqon doonaan kuwo u dhow xaqiiqda.

## Waa maxay AI-ga wax soo saaraa?

AI-ga wax soo saaraa (generativ) waxaa loola jeedaa moodeello AI ah oo soo saara wax cusub iyagoo ka duulaya xogta lagu tababaray. Nuxurka la soo saaraa wuxuu noqon karaa qoraal, sawir, fiidyow la duubay, cod – ama labadooda oo laysku daray. Adeegyada AI-ga ee caanka noqday sannadihii ugu dambeeyay waa kuwo wax soo saara, waxayna kaga duwan yihiin moodeellada kale ee caadiga ah sida kuwa sameeya shaandhaynta spam-ka, aqoonsiga sawirrada, ama kuwa ku jira nidaamyada talo-bixinta ee baraha dijitaalka ah.

AI-ga wax soo saara waxaa lagu dhaleeceeyey inay ku xad-gudubaan xuquuqda daabacaadda, sababtoo ah moodallada waxaa lagu soo tababaray agab laga yaabo in aan oggolaansho looga haysan dadkii lahaa xuquuqdaas. Tiknoolajiyadu waxay nuugtaa ama isticmaashaa xog aad u baaxad weyn oo loogu talagalay tababar, waxayna soo saartaa agab cusub oo ku dhisan waxyaabihii ay dad kale horay u sameeyeen, inta badanna taasi waxay dhacdaa iyadoo aan dadkaas wax magdhow ah laga siin shaqadooda. AI-ga wax soo saraa wuxuu sidoo kale abuuri kartaa sheegashooyin aan sax ahayn, maadaama moodeelladu aanay lahayn aqoon dhab ah, balse ay sameeyaan qiimeyn ku salaysan suurtagalnimo iyagoo ka duulaya waxa ay hore u barteen. In teknoolajiyaddu u baahan tahay xog badan waxay sidoo kale ka dhigan tahay in adeegyadu mararka qaarkood ay kaydiyaan waxa lala wadaago. Sidaa darteed, isticmaaluhu waa inuu ka fogaadaa gelinta xog xasaasi ah oo ku saabsan naftiisa ama dadka kale marka uu isticmaalayo adeegyada kala duwan ee AI-ga.

## Waa maxay deep fakes?

AI-ga wax soo saraa (Generativ) waxay waddo u xaaraan waxa loogu yeero (deep fakes) – kuwaas oo ah sawirro ama muuqaallo uu AI-gu abuuray oo aad ugu dhow xaqiiqda. Deep

fakes-ka waxaa si gaar ah u adag in laga saaro sawirrada iyo muuqaallada kale ee dhijitaalka ah ee dhabta u eg, sababtoo ah ma ahan kuwo la tafatiray ama dib loo habeeyay, balse waa nuxur asali ah oo dhijitaal ahaan loo abuuray. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inay ku jiraan khaladaad kale oo kashifaya, laakiin tiknoolajiyadu waxay noqonaysaa mid marba marka ka dambaysa sii fiicnaanaysa, waxaana laga yaabaa inay adkaato in la kala saaro agabka dhabta ah iyo kan beenta ah. In lala yimaado aragti naqdin leh marka la isticmaalayo warbaahinta waa mid muhiim ah, sidoo kalena ilaha lagu kalsoon yahay ayaa door weyn ka ciyaara.

## Waa maxay wehelka AI-gu (companion)?

Saaxiibka AI-gu, waa wehel dhijitaal ah, waa adeeg AI oo wax soo saara kaas oo ku dayda xiriirka bini'aadamka. Adeeggan wuxuu inta badan u muuqdaa qaab caawiye shakhsi ah, lataliye, ama saaxiib dhow, balse waxaa sidoo kale jira adeegyo loogu talagalay jilidda doorarka (rollspel) ama leh dareen jaceyl.

Saaxiibka AI-gu wuxuu yeelan karaa qaabab kala duwan – laga bilaabo bot-ka wada hadalka (chattbot) ee fudud ee websaydada ilaa avatars hadla oo u eg bini'aadamka. Adeegyo kala duwan ayaa leh ujeeddooyin kala duwan, inta badanna isticmaalkoodu waa lacag.

Cilmi-nafsiga bini'aadamka ayaa sababa in aynu si degdeg ah ugu sifeeyno sifooyin bini'aadam wax kasta oo aan aragno. Sidaas awgeed, waxaynu la yeelan karnaa xiriir dhow walxo iyo xayawaan – ama xitaa AI-ga. Adeegyada wehelku (companion) waxay bixin karaan taageero shucuureed, balse sidoo kale waa la dhaliilay, maadaama ay abuuri karaan xiriirro aan caafimaad qabin isla. Gaar ahaan carruurta iyo dhalinyarada ayay tani dhib ku noqon kartaa, waxaana soo baxay baaqyo sheegaya in dadka ka yar 18 sano aysan gabi ahaanba isticmaalin adeegyadan.

Websaytka Hey'adda warbaahinta waxaad ka heli kartaa talooyin fudud, taageero iyo agab ku saabsan caadooyinka isticmaalka warbaahinta ee carruurta iyo dhalinyarada – kuwaas oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta labadaba.

Webbplatska **Hay'adda warbaahinta** waxaad ka heli kartaa talooyin fudud, taageero iyo agab ku saabsan caadooyinka isticmaalka warbaahinta ee carruurta iyo dhalinyarada, kuwaas oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta labadaba.

**Safer Internet Centre Sverige** (Xarunta Internetka ee Ammaanka) Iswiidhan) waa dadaal wadajir ah oo loogu talagalay badbaadada carruurta iyo dhalinyarada ee internetka. Hay'adda warbaahinta ayaa maamusha xaruntan iyadoo kaashanaysa ururada xuquuqda carruurta u dooda ee Bris iyo ECPAT.

**Medfinansieras av Europeiska unionen**



**Boqolkiiba inta carruurta isticmaasha AI-chattbotar barnaamijyada wada-hadalka AI toddobaadkii hal mara ama ka badan, iyadoo loo eegayo jinsiga (wiil ama gabar (%)**

Xogta/Isha: Dhallinyarada & Warbaahinta 2025 (Ungar & medier 2025), Mediemyndigheten

